Tusmada Fududaynta

Aaga Cagaarka ah

Higsiga Barakaysan ee Hormarinta Xaafada

Tusmadaan hagista ah ayaa loo adeegsan karaa in laga shaqaysiiyo loogana qaybgeliyo bulshooyinka doodaha iyo dedaallada la xariira abaabulka caafimaadka xaafadahooda. Xaafad kasta ayaa leh baahi gaar ah iyo muhiimad ku salaysan cadaalada bii'ada ee saamaynaysa bulshada. Waxaan filaynaa in ayadoo la adeegsanaayo doodaha wada shaqaynta ah ee lagu sameeyo aqoon kororsigaan, xalalka ay bulshadu hormuudka u tahay, ayadoo la raacaayo caddaalada iyo sugnaanta, la aqoonsado si loo hormariyo meelaha uu culayska ugu badan saaray wasaqda hawadu loona badelo deegaanno hormar ka gaara caafimaadka.

Agabka loo Baahan yahay

Agabka Bandhiga Caafimaadka Xaafada

- "'Maqaalka Taariikhda la ilaaway' ee Sida Dawlada Maraykanku u Kala Soocday Ameerika" NPR (daabacan)
- "Maqaalka laga bilaabo Mempgis ilaa Aqalka Cad, Qareenkaan Ayaa La dagaalamaaya Faquuqa iyo Cadaalada Bii'ada" NRDC (daabac)
- "Jaantuska Sinaan la'aanta: Far ku fiiqida Maraykanka Cusub" Khariirad tusmayn ah ee xaafadaha khatarta ku jira ee Maraykanka

Agab Dheeraad ah

- Kumbuyuutar iyo iPad
- EJ 101 Kaartuun
- Waraaqda boorka
- Qalin koobiyo
- Koolo bac

Tallaabooyinka Fududaynta

A. Horudhac: Yaan nahay? Yaa halkan wada jooga (magaca/xaafada)? Yoolalka maanta [10 daqiiqo]

B. Waa maxay Aaga Cagaaran? [15 daqiiqo]

1. U sheeg ka qaybgaleyaasha inay soo qaataan kursi ayna sameeyaan mareegta koox balaaran.
2. Waqti geli inaad iskugu keento ka qaybgaleyaasha meel, adoo u dhiibaaya jaantuska Aagga Cagaaran iyo mabaadii'da Aasaaska u ah:

Naqshada Aagaga Cagaaran

Mashruuca Aagaga Cagaaran ayaa adeegsada naqshada saamaynta guud, kaasoo ka kooban dhammaan wasaqda hawada ee aag gaar ah oo lagu daray caddaalad darooyinka dhaqan dhaqaale iyo caafimaad ee kale. Bulshada aan cadaanka ahayn, bulshooyinka asaliyiinta ah, iyo bulshooyinka kale ee danyarta ah waa kuwa ku nool deegaannada ay saamaynta ugu badan ku reebtay wasaqaynta bii'adu, taas awgeedna, waxaa si gaar ah u saameeyay cadaalad darada bii'ada.

Aagga Cagaaran ayaa ku salaysan mabda'a aasaasiga ah oo ah in hawo iyo dhul nadiif ah ay yihiin xaquuqda aasaasiga ah ee aadanaha, waana inaan lagu jaan-goyn dakhliga iyo isirka. Ololaha Aagag Cagaaran ayaa ka shaqaynaaya in xooga lagu saaro maalgashiyada dawlada (tusaale ahaan, sharciyada iyo xeerarka) iyo ganacsiyada maxaliga ah iyo khayraadka deegaannada culayska ugu badan la saaray - ama, deegaannada loo aqoonsado *Aaga Cagaaran*.

Codadka dadka deegaanka ayaa muhiimada lagu siinayaa qorshaynta iyo abaabulka Aaga Cagaaran. Higsiga, yoolalka, iyo muhiimada Aagaga Cagaaran ayaa lagu saleeyaa codka dadka deegaanka, taasoo muujinaysa xaaladaha nololeed ee dhabta ah iyo xalalka la xariira ee ay ku taliyeen dadka deegaanku. “Bulshooyinka Aagga Cagaaran ayaa ah tusaaleyaasha waxa isbadelka bulshadu hogaaminayso noqonaayo”[1].

3. U sheeg ka qaybgaleyaasha inay u jeestaan dhankooda bidix ayna kala doodaan su'aalaha soo socda qofka kale. Ku boori inay tixgeliyaan xaafadaha ku yaala magaallada ee waajahaaya saameynada guud ee ka faa'iidaysan kara ol-olaha Aagaga Cagaaran iyo barnaamijka:
    a. Ma ku nooshahay aag waajahaaya saamayno guud?
    b. Maxaa saamaynaaya aagaan?
    c. Yaa ku nool aagaan?

[1] Mashruuca Cadaalada Bii'ada ee California, CEJA. Aagaga Cagaaran ee California: Tiirarka Guud iyo Mabaadii'da Aasaasiga ah. https://calgreenzones.org/about-the-green-zones-initiative/common-roots-and-core-principles/

4. U sheeg ka qaybgaleyaasha inay istaagaan. Waxay samayn doonaan jimicsi socda; jimicsigaan ayaa loogu talagalay inay ka qaybgaleyaashu uga fakaraan xariirka ka dhexeeya cadaalada bii'ada iyo ciladaha cadaalada bulshada.
5. U sharax in gees kasta oo qolka kamid ah uu matalaayo cilad gaar ah, kuwo ah: caddaalada biiada, cadaalada bulshada, cadaalada caafimaadka, ama cadaalada dhaqaalaha. U sheeg su'aasha: Aaga Cagaaran ma wuxuu muhiimada siinayaan cadaalada bii'ada, cadaalada bulshada, cadaalada caafimaadka, ama cadaalada dhaqaalaha? Sii ~3 daqiiqo si ay uga fakaraan ayna ku go'aansadaan.
6. Marka qof kasta doorto geeskiisa, u sheeg inay dhexdooda ka sheekaystaan *sababta* ay u doorteen geeskooda. Sii ~3 daqiiqo oo ay ku doodaan.
7. Adoo geesba mar tagaaya, u sheeg in xal qof oo afhayeen ah uu sharxo geeskooda *sababta*.
8. Soo khulaasee jimicsiga adoo sharaxaaya in Aaga Cagaaran ay ku jiraan *dhammaan* arimaha quseeya aagagaan, waayo dhammaan ciladaha ayaa isku xiran marka laga fakaraayo caafimaadka aasaasiga ah ee xaafada.

C. Bandhiga Caafimaadka Xaafada [40 daqiiqo]

1. Waqti geli si aad iskugu xirto xidhiidhada ka dhexeeya faquuqa, isticmaalka dhulka, iyo culaysyada bii'ada ee aan loo sinayn:

Xaduudaha Magaallada

Deegaannada aan ku nool nahay ayaa saamayn wayn ku leh caafimaadkeena. Cabirada bii'ada, sida helitaanka deegaannada kuu dhow ee cagaaran, tayada hawada, u dhawaanshaha wadooyinka waawayn, iyo heerarka gaadiidka meesha mara, dhammaan ayaa qayb ka qaata tayada guud ee nolosheena; sababahaan ayaana kaladuwan si aan loo sinayn xaafadaha. Gudaha Maraykanka, bulshooyinka aan cadaanka ahayn, kuwa asaliyiinta ah, iyo bulshooyinka danyarta ah ayay u badan tahay inay helaan hawo aan tayo fiican lahayn, ku nool yihiin xarumaha warshadaha ah, uu saamaynta ugu badan ku yeeshaan xaaladaha degdega ah ee cimilada. Sinaan la'aantaan maaha fashil siyaasadeed, waa natiijo ka dhalatay.

Xaduudaynta ayaa bilaabatay 1930, markaas oo xaafadaha lagu qiimeeyay khatarta ay ugu jireen daynta guriga. Xaafadaha ayaa lagu qiimeeyay afar qaybood: 1) Nooca A (ugu fiican); Nooca B (wali wanaagsan); Nooca C (soo xumaanaysa), iyo nooca D (khatar badan). Xaafadaha loo asteeyay kuwo "khatar badan" ayaa lagu asteeyay khad cas gudaha khariirada waxaana loo diiday inay helaan daynta guryaha iyo fursadaha kale ee dhaqaalaha. Xaafadahaan ayaa badanaa ahaa deegaannada gudaha magaallada oo ay inta badan dagan yihiin dadka Madoowga ah iyo bulshooyinka soo galootiga ah. Arrintaas awgeed, xaafadaha ayaa lagu kala soocay isir iyo dabaqad. Maanta, waxaan aragnaa in layn cas gelinta taariikhiga ah ay wali saamaynayso bulshooyinka; maaha wax lala yaabo in bulshooyinka aan caddaanka ahayn ay ku nool yihiin meelaha qiiqa badan iyo meelaha wadooyinka jaamka badan maraan. Xeerarkii ka danbeeyay khad cas marinta, markii saraakiisha xaduudayntu ay

u baahdeen meel ay warshad cusub ka dhigaan ama ay ka dhisaan wado wayn, xaafadaha laynka cas la gashay ayaa ahaa taargadka la beegsanaayay markasta.

2. Abuur saddex xarumood, mid uu yaalo kumbuyuutar ama iPad Mid kasta oo kamid ah labada xarumood, saar hal qoraal oo daabacan: "'Taariikhda la ilaaway' ee Sida Dawladu Maraykanku u Kala Soocday Ameerika", "Laga bilaabo Memphis ilaa aqalka Cad, Qareenkaan ayaa Ka Hortagaaya Khad Cas gelinta iyo Cadaalad darada Bii'ada". Meesha aad kumbuyuutarka dhigtay, fur webseedka "Jaantuska Sinaan la'aanta: Khad cas Gelinta Ameerikada Cusub".
    a. Xarunta #1: Xarun isdhexgal oo saldhig u ah diiwaannada farsamooyinka khadka cas ee kasoo biloowday 1930-aadkii. Ka qaybgaleyaasha ayaa arki kara diiwaannada iyo khariiradaha muujinaaya taariikhda khad cas saarida cadaalad darada isirka ee dhammaan wadanka ka jira maanta; "Jaantuska Sinaan la'aanta: Khad cas Gelinta Ameerikada Cusub".
    b. Xarunta #2: Fahan sida dawlada hoose, tan gobalka, iyo tan federaalku ay u difaaceen ayna u dhaqan gasheen xeerarka faquuqa isirka ku salaysan: "'Taariikhda la ilaaway' ee Sida Dawlada Maraykanku u Kala Soocday Ameerika".
    c. Xarunta #3: Ku xir cawaaqibyada cadaalad darada bii'ada iyo culaysyada ku xeeran adeegsiga dhulka iyo khad cas saarista: "Laga bilaabo Mempgis ilaa Aqalka Cad, Qareenkaan Ayaa La dagaalamaaya Faquuqa iyo Cadaalada Bii'ada".
3. U kala qaybi ka qaybgaleyaasha xarun kasta labo-labo ama kooxo yaryar. Ku boori inay akhriyaan ama ay ku shaqeeyaan agabka goobtooda. Sii ~10 daqiiqo oo ay ku akhriyaan ayna ku sameeyaan xaruntooda; ku boori inay wada sheekaystaan.
4. Sii ka qaybgaleyaasha dhowr daqiiqo si ay u soo koobaan khayraadka kooxda guud.
5. Adoo xarunba mar tagaaya, u sheeg ka qaybgaleyaasha inay xubnaha kale la wadagaan waxyaabaha ay barteen; hormuud u noqo wada sheekaysiga si aad u adkayso muhiimada il kasta oo xogeed iyo sida ay u waafaqayso dhinacyada kale, ayadoo la adeegsanaayo su'aalo hogaamin leh:
    a. Sidee ayaad u aragtaa xidhiidhada ka dhexeeya isirka iyo culaysyada saaran xaafadaha isirada gaarka ah?
    b. Sidee isticmaalka dulku u saameeyaa caafimaadka xaafada?
    c. Sidee barnaamijka Aagaga Cagaaran u yaraynayaa qaar kamid ah culaysyada taariikhiga ah iyo/ama kuwa hadda jira ee saamaynaaya xaafadaha khadka cas la marshay?

D. Xaafadeena [20 daqiiqp]

1. Sii waraaq iyo qalin koobi dhammaan ka qaybgaleyaasha. Ku boori inay suureeyaan xaafadooda ayna sawiraan guryahooda. U sheeg inay ku daraan goobaha bad dhan hal mayl ku xeeran gurigooda daafaha waraaqda. Xarumaha waa in lagu daraa meelaha uu ka jiro culayska bii'ada (tusaale xarumaha warshadaha, jidadka waawayn) iyo meelaha leh adkaysiga dhanka bii'ada (tusaale, dugsiyada, beeraha nasiinada, masaajida)

2. U sharax in sawirada xaafadooda ay muujinayaan waxa bulsho culays badan saaran yahay tahay, iyo sida bulshooyinku ay u aqoonsan karaan meelo ay u asteeyaan ololaha iyo barnaamijka Aaga Cagaaran. Sii ~10 daqiiqo si ay li sawiraan kuna fahmaan.
3. Marka ka qaybgaleyaashu ay dhammeeyaan sawirida xaafadooda, u sheeg inay la wadaagaan kooxda noocyada goobaha culayska bii'adu saaran yahay iyo heerka adkaysiga ee ku xeeran, waa muhiim sidoo kale in laga fakaro xaafadaha qoomiyadaha gaarka ah inta lagu jiro doodaan:
    a. Waa maxay walaacyada gaarka ah ee bii'ada ee aad ka qabto xaafadaada?
    b. Waa maxay walaacyada gaarka ah ee bulshada ee aad ka qabto xaafadaada?
    c. Xaafadaadu ma qabtaa culaysyada aan loo sinayn ee dhanka bii'ada? (tusaale ahaan, ma jiraa wax ka badan walaac la xariira bii'ada iyo/ama nidaamka ayaad ka qabtaa xaafadaada?)
    d. Sidee kula tahay xaafad caafimaad qabta, oo hormar samaynaysa?
    e. Waa maxay aagaga xaafadaada ee hormaray?
    f. Waa maxay khayraadka kaabi kara meelaha hormarsan ee xaafadaada?
    g. Waa maxay khayraadka xaafadaadu u baahan tahay si ay xal ugu hesho walaacyada gaarka ah ee aad qabto?

Aagaga Cagaaran ee Minneapolis

Wada hadal lamid ah kan ayay qabteen abaabuleyaal maxali ah iyo shaqaalaha Magaaladu oo lagu qabtay kulannada Kooxda Diirada Aagaga Cagaaran ee Minneapolis, iyo sidoo kale waraysiyo gaar ah oo lala yeeshay dadka deegaanka. Wada sheekaysiyadaan ayaa lagu qabtay dedaalo lagu doonaayo aqoonsiga baahiyaha taagan iyo walaacyada bulshada ee la xariira cadaalada bii'ada iyo in si gaar ah loo qeexo xaduudaha Aagaga Cagaaran. Xubnaha bulshada ayaa u aqoonsaday Waqooyiga iyo Koonfurta Minneapolis meelaha ugu badan ee culaysku saaran yahay, kuwaasoo la xariira dhinacyada kaladuwan ee cadaalad darada bii'ada, bulshada, dhaqaalaha, iyo isirka.

Fikirka iyo diirada Aaga Cagaaran ayaa loogu talagalay inay abuuraan ayna qeexaan dadka deegaanku, sababtaan awgeed, ma jiri doonaan Labo Aaga Cagaaran oo isku mid noqonaaya.

E. Higsiga bulshada [25 daqiiqo]

1. Abuur 3-4 xarumood, kuwaasoo mid kasta leedahay waraaqaha waawayn ee boorarka ah iyo qalin koobiyo. Xarumahaan ayaa noqon doona bar kulanadaan abuurista higsiga bulshada.
2. U kala qaybi ka qaybgaleyaasha xarun kasta labo-labo ama kooxo yaryar. U sharax in su'aalaha hagista ah lagusoo dhajin doono si ay u hagaan dood wadareedkooda:
    a. Waa maxay riyooyinka aad la jeclaan lahayd xaafadaada?
        i. Sii ~5 daqiiqo oo ay uga fakaraan ayna uga doodaan.
            1. U sheeg inay ku qoraan fikradahooda guud iyo riyooyinkooda mid kamid ah saddexda waraaqaha boorarka ah ee la heli karo.

2. U sheeg xarun kasta inay riyooyinkooda ku dhajiyaan darbiga ayagoo isku xijinaaya. Adoo xarunba mar tagaaya, ku boori ka qayb galayaasha inay sameeyaan socodka kooban ee boorarka, ayagoo ogaanaaya fikradaha iyo riyooyinka xubnaha kale ee kooxda iyo darista.
3. Dib ugu dir ka qaybgaleyaasha xarumahooda si ay uga jawaabaan su'aasha xigta.

b. Waa maxay caqabadaha hortaagnaan kara riyooyinkaan?
   i. Sii ~5 daqiiqo oo ay uga fakaraan ayna uga doodaan.
      1. U sheeg inay ku qoraan fikradahooda guud iyo hamiyada mid kamid ah labada waraaqaha boorarka ah ee la heli karo.
      2. U sheeg xarun kasta inay riyooyinkooda ku dhajiyaan darbiga ayagoo isku xijinaaya. Adoo xarunba mar tagaaya, ku boori ka qaybgaleyaasha inay sameeyaan socodka kooban ee boorarka, ayagoo ogaanaaya fikradaha iyo hakashada xubnaha kale ee kooxda iyo darista.
      3. Dib ugu dir ka qaybgaleyaasha xarumahooda si ay uga jawaabaan su'aasha ugu danbaysa.

c. Maxaa loo baahan yahay in la sameeyo ama la badelo si riyooyinkaan ay uga adkaadaan caqabadaha jira (tusaale ahaan, khayraadka, barnaamijyada, helitanaka xogta, xeer dejiyaasha)?
   i. Sii ~5 daqiiqo oo ay uga fakaraan ayna uga doodaan.
      1. Ku boori inay ka fakaraan deegaankooda iyo nidaamka oo dhanba.
      2. U sheeg inay ku qoraan fikradahooda iyo hamiyada waraaqda boorka ugu danbeeya.
      3. Adoo xarun ba mar tagaaya, ku boori kooxaha inay xalalka ay helaan cod dheer ku sheegaan. Hormuud u noqo wada sheekaysiga si aad u adkayso muhiimada xal kasta iyo sida ay u khuseeyaan baahiyaha xaafad kasta.

F. Ololaheena Aaga Cagaaran [15 daqiiqo]

1. Shid muuqaalka kaartuunka ah ee EJ 101.
2. Sii ka qaybgaleyaasha daqiiqad ay ku fariisaan kuna soo bandhigaan. Adeegso su'aalo tusmayn ah marka loo baahdo:
   a. Maxaa dhibaato ku hayay xaafada?
   b. Ma jireen dad ama bulshooyin aysan saamaynta/culaysku ku dhicin?
   c. Maxaa dadka isku keenay?
3. Si wadajir ah, ka dooda tallaabooyinka kaladuwan iyo go'aannada (ay gaareen magaalooyinka, xaafadaha, warshadaha, iwm.) ee saamaynta ku leh bulshooyinkeena, adinkoo u eegaaya xaafadaheena gaarka ah adoo tixraacaaya sawirada Xaafadeena:
   a. Sidee isticmaalka dhulku u saameeyaa caafimaadka xaafada sawirka lagu muujiyay?
   b. Ma kula tahay in xaafada ku jirta jaantuska ay ka faa'iidaysanayso barnamaijka Aaga Cagaaran?
   c. Xagee ayaan ku arkaynaa wada shaqaynta macnaha leh ee bulshada?
   d. Sidee ayaan ula shaqayn karnaa saraakiisha magaallada ama ganacsiyada marka laga

hadlaayo u qareemida EJ?

4. U sharax in dedaallada isku dubaridka ah ee ay hogaaminayaan xubnaha bulshada ee ku jira muuqaalka kaartuunka ah ay yihiin tusaalaha rasmiga ah ee waxa ololaha Aagaga Cagaaran u ekaan karo: xubnaha bulshada oo isku imaanaaya, xal u raadinaaya kana doodaaya caqabadaha, abuuraayana qorshe abaabul oo lagula dagaalamaayo cadaalad darada, kaasoo ku xiran xalalkooda rasmiga ah iyo dookhyada gaarka ah - sida himilooyinka iyo xalalka ka qaybgaleyaashu kusoo bandhigeen shaqadii hore.

G. Dhisida awooda abaabulka bulshada oo joogto ah [20 daqiiqo]

1. U sheeg ka qaybgaleyaasha inay soo qaataan kursi ayna sameeyaan mareegta koox balaaran.
2. Ku dhiiri geli ka qaybgaleyaasha inay ka wada shaqeeyaan buuxinta shaqada *meesha-goorta-cida-waxa-sababta* ee la xariira abaabulka bulshada, gaar ahaana abaabulka ololaha Aagaga Cagaaran ee xaafadahooda/magaallada:
    a. Jihaynta diirada iyo baahiyaha bulshada:
        i. *Xagee* ayay tahay in abaabulka lagu sameeyo? (Xaafada? Dhismaha xafiiska magaallada)?
        ii. *Goorma* ayay tahay in la bilaabo?
        iii. *Yay tahay* inuu door ku lahaado? (Bulshooyinka?)
        iv. *Maxaa dhacay* oo nagu hagay inaan abaabulno? (Wasakhda hawada? Hormarinta dhulka? Masiibada dabiiciga ah?)
        v. *Maxay* arintaani u qusaysaa Aagaga Cagaaran? (*Muxuu* barnaamijka Aagaga Cagaaran u taageerayaa bulshadeena?)
3. Dhis su'aalaha looga jawaabay loogana dooday kor, siiwad abuurista xeelado. Ku boori ka qaybgaleyaasha inay ka wada shaqeeyaan sii wadista dhisida xeeladaha, laakiin hadda waxaa diirada la saarayaa fahanka caqabadaha imaan kara, la shaqaynta cid kasta oo saamayntu ku dhacday, iyo dhisida awood:
        i. Xagee ayaan u baahan nahay inaan diirada ku saarno wada shaqaynteena bulshada si aan u xaqiijino in codka qof kasta lagu daro higsiyada/muhiimadaha aan qeexnay?
        ii. Waa maxay waxbarashada diirada saaraaya bulshada ayay tahay in la diyaariyo si hormar degdeg ah looga sameeyo ol-olaha Aagaga Cagaaran?
        iii. Maxaan wali u baahan nahay in aan barano ama fahanno si aan u abaabulno ololaha Aagaga Cagaaran oo guulaysta? (Waa maxay agabka na taageeri kara? Agabka isdhexgalka, Qariiradaha, Warbixinta wasaqda hawada?)
        iv. Yaa ka hor imaan kara ol-olahaan? (Diyaarinta dood kahortag ah)
        v. Maxay su'aalahaan muhiim ugu yihiin xeeladeena abaabulka?

H. Muujinada iyo Gabo-gabada [10 daqiiqo]

1. Khulaasada; maxay barteen ka qaybgaleyaashu? Maxay la wadaagi doonaan xubnaha bulshada? Maxaan wali laga jawaabin?
2. Oga mahadnaq ka qaybgalayaasha waqtigooda iyo ka qaybgalkooda; waxaan filaynaa inay wax cusub barteen ayna hami u qabaan inay sii wadaan wada sheekaysiga lamid ah kan maanta.